



**SOUTHWEST STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT**

Ref: ISWA-0108/13/06/15

13/06/2015

Xeer Madaxweyne Lr.36, June 13, 2015 kuna saabsan Magacaabid Taliye K/xigeenka Nabadsugida Gobolka Shabeelaha hoose ee Dowladda Koonfur Galbeed.

Madaxweynaha Dowladda Koonfur Galbeed

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Koonfur Galbeed ee Soomaaliya Qodabka 83aad faqradiisa (c);

Markuu tixgeliyey: Ahmiyadda ay u leedahay Dowlad Goboleedka in Amniga la sugo si xasilooni loo helo;

Markuu Arkay: In Baahi loo qabo buuxinta jagada Taliye ku xigeenka Nabadsugida Gobolka Shabeelaha hoose ee Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya;

Markuu ka Fiirsaday: Kartadiisaiyo aqoontiisa ee u leeyahay Arrimaha loo xilsaaray;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, **MAXAMED SH. XUSEEN MAXAMED (ADEERAY)**, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Taliye ku xigeenka Nabadsugidda Gobolka Shabeelaha hoose ee Koonfur Galbeed.

Mudane Shariif Xasan Sheekh Aden

Madaxweynaha Koonfur Galbeed Soomaaliya

